





DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA XISAABIYA GUUD

	2020	2021	2022	2023	2024
Tax Revenue	139,529,217	162,766,910	181,691,842	224,631,762	266,763,916
Other Revenue	71,704,628	66,794,410	80,977,903	104,859,950	102,589,875
Total Domestic Revenue	\$ 211,233,845	\$ 229,561,321	\$ 262,669,745	\$ 329,491,711	\$ 369,353,791

WARBIXINTA FULINTA MIISAANTIYAD SANNADEEDKA BILAHADA JANAAYO IYO FEBRAAYO 2025



Jaantuska 2aad: Dhabta Dakhliga Canshuurta Jan 2025



WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYADDA

BISHA February 2025

WAXAA SOO SAARAY WARBIXINTAAN XAFIISKA XIISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAA WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

TUSMADA WARBIXINTA

HORDHAC	1
DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025	2
DAKHLIGA DAWLADDA BISHA FEBRAAYO 2025 & 2024	3
DAKHLIGA CANSHUURAHHA	4
DAKHLIYADA KALE.....	6
DEEQAHA DIBADDA	7
DHABTA KHARASHAADKA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025	8
DHABTA KHARASHAADKA JAN IYO FEB, HAY'ADAHA DAWLADDA.....	11
KHARASHAADKA JOOGTAD AH	11
KHARASHAADKA MASHAARIICDA.....	11
Lifaaqa 1^{aad}: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah, 2025	12
Lifaaqa 2^{aad}: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda, 2025.....	31

Liisk Jaantusyada

Jaantuska 1 ^{aad} : Dakhalig Bish Febraayo 2025 & 2024	3
Jaantuska 2 ^{aad} : Qaybaha Dhabta Dakhliga Gudaha Jan-Feb 2025	4
Jaantuska 3 ^{aad} : Iskudarka Dhabta Dakhliga Gudaha, Jan iyo Feb, 2025 iyo 2024	5

Liiska shaxaha

Shaxda 1 ^{aad} : Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan iyo Feb 2025	2
Shaxda 2 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Feb 2025 & 2024	3
Shaxda 3 ^{aad} : Iskudarka Dakhliga Gudaha ee Jan-Feb ee Sannadaha 2025 & 2024.....	4
Shaxda 4 ^{aad} : Deeqaha Dibadda Jan-Feb 2025 iyo 2024	7
Shaxda 5 ^{aad} : Dhabta Jan-Feb 2025 & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda,.....	8
Shaxda 6 ^{aad} : Kharashaadka la bixiyey Bisha Feb 2025 iyo 2024	9
Shaxda 7 ^{aad} : Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan iyo Feb 2025 & 2024	10
Shaxda 8 ^{aad} : Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda	11

HORDHAC

Warbixinta fulinta miisaaniyadda waa warbixin bille ah, waxayna faahfaahinaysaa fulinta ama dhaqangelinta miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxay isbarbardhig ku samayn doontaa dhabta dakhliga lasoo uruuriyey iyo kharashaadka dawladda ee la bixiyey sannadka gudhiisa iyo miisaaniyad sannadeedka dakhliga iyo kharashka. Waxayna waafaqsan tahay miisaaniyadda sannadka 2025 oo ay ansixiyeen laba aqal ee baarlamaanka.

Kutalagalka hore ee miisaaniyadda waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka ah ee uu labada aqalka ee baarlamaanka ansixiyeen oo aan waxba laga badalin, kutalagalka danbe waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka oo loo kala wareejiyey miisaaniyadda hay'adaha qaar ama madaxyada miisaaniyadda ee hay'adda dhexdooda.

Dakhliga Gudaha ayaa 32% ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga dawladda, halka deeqaha dibadda oo isugu jira kab miisaaniyaddeed iyo mashaariic ay ka tahay 68% wadarta dakhliga miisaaniyad sannadeedka 2025. Miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah aya 46% ka ah wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud, halka Miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ka tahay 54% wadarta miisaaniyadda Kharashaadka guud ee sannadka 2025.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Jan iyo Feb 2025 ayaa ahaa \$59M, wuxuuna ka badan yahay 2% Iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan iyo Feb 2024. Sidoo kalle iskubiirinta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Jan iyo Feb 2025 aya ahayd \$31M oo ka badan 196% iskubiirinta deeqaha dibadda la helay bilaha Jan iyo Feb 2024.

Wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025 ayaa ahayd \$87M waxayna ka badan tahay 25% wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2024.

Warbixintaan ayaa ka koobnaan doonto saddex qaybood. Qaybta koowaad ee warbixinta fulinta miisaaniyadda waxaa lagu faahfaahin doonaa dhabta dakhliga dawladda; Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda, iyadoo la isbarbardhigi doono dhabta dakhliga iyo miisaaniyad sannadeedka qaybaha dakhliga Dawladda ka kooban tahay.

Qaybta labaad ee warbixinta waxaa lagu faahfaahin doonaa kharashaadka dawladda ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025, iyadoo loo fiirinaayo waafaqsanaanta sida loogu ansixiyey miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxaana loo kala qaadi doonaa kharashaadka dawladda labo qaybood; kharashaadka Joogtada ah iyo kharashaadka mashaariicda.

Warbixinta qaybta saddexaad waxaa ku lifaaqan faahfaahinta isticmaalka miisaaniyadda ee hay'adaha dawladda, loona kala qaaday sida ay hay'adaha u fuliyeen kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda ee miisaaniyad sannadeedka 2025. Lifaaqa koowaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa faahfaahinta isticmaalka hay'adaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, lifaaqa labaad ayaa lagu faahfaahin doonaa isticmaalka hay'adaha ee kharashaadka miisaaniyadda mashaariicda 2025.

DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025

Miisaaniyadda Asalka ee wadarta dakhliga ayaa ah \$1,331,969,583 oo la filaayo in ay dawladda soo uruuriso sannadka 2025 gudihiisa. Miisaaniyada Dakhliga Gudaha aya ah \$430,341,430 oo **32%** ka ah wadarta miisaaniyadda, halka deeqaha dibada la filaayo in la soo xareeyo ay tahay \$901,628,154 oo **68%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga ee sannadka 2025.

Faah-Faahin	Kharashka Feb 2025	Iskudarka Kharashka Jan iyo Feb 2025	Kutalagalka Hore	% Fulinta Jan-Feb
Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadad	\$57,823,201	\$89,808,767	\$1,331,969,583	7%
Dakhliga Gudaha	32,136,360	58,905,429	430,341,430	14%
Canshuuraha	22,885,077	41,741,897	295,289,259	14%
Canshuurta Dakhliga & Faa'idooyinka	7,451,887	9,878,773	38,031,213	26%
Canshuurta Adeegga & Agabka	3,357,440	7,488,785	56,111,497	13%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	11,427,653	23,429,679	186,211,437	13%
Canshuuraha Kale	648,097	944,659	14,935,112	6%
Dakhliyada Kale	9,251,282	17,163,533	135,052,170	13%
DEEQAHA DIBADDA	25,686,841	30,903,338	901,628,154	3%
Deeqaha laba dhinac	8,430,806	9,357,980	42,000,000	22%
Deeqaha Dhinacyada badan	17,256,035	21,545,358	859,628,154	3%

Shaxda 1^{aad}: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan iyo Feb 2025

Shaxda 1^{aad} waxay soo bandhigaysaa dhabta dakhliga la helay bilaha Jan, Feb iyo miisaaniyad sannadeedka 2025. Wadarta dakhliga la helay bisha Febraayo ayaa ah \$58M, dakhliga Gudaha waxaa ka soo xarootay \$32M una dhiganta **56%** wadarta dakhliga la helay bisha Febraayo, Deeqaha dibadda ayaa la helay \$26M oo u dhiganta **44%** wadarta dakhliga la helay bisha Febraayo 2025.

Wadarta dakhliga la helay bilaha Jan iyo Feb ayaa ah \$90M oo u dhiganta **7%** miisaaniyadda sannadeedka 2025. Dakhliga Gudaha aya lasoo ururiyey \$59M oo u dhiganta **14%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Deeqaha dibadda ayaa la helay \$31M oo u dhiganta **3%** miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay bilah Jan iyo Feb dakhli dhan \$10M oo u dhiganta **26%** miisaaniyad sannadeedka canshuurtaan. Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa la helay \$7.5M oo ah 13% miisaaniyadda sannadka, sidoo kale Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa la helay \$23M oo u dhiganta 13% miisaaniyad sannadeedka 2025.

Deeqaha laba dhinac ayaa la helay bilaha Jan iyo Feb dakhli dhan \$9M oo 22% ka ah miisaaniyadda sannadka 2025, Deeqaha dhinacyada badan waxaa la helay \$22M oo u dhiganta 3% miisaaniyadda sannadka 2025.


DAKHLIGA DAWLADDA BISHA FEBRAAYO 2025 & 2024

Dakhliga dawladda wuxuu ka soo xaroodaa dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa loo kala qaadaa dakhliga canshuraha iyo dakhliyada kale. Shaxda 2^{aad} waxay isbarbardhigaysaa dakhliga dawladdu heshay bisha Febraayo ee sannadaha 2025 iyo 2024.

Faah-Faahin	Kharashka Feb 2025	Kharashka Feb 2024	Koror/ Naaqus
Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadadda	\$57,823,201	\$40,937,475	41%
Dakhliga Gudaha	32,136,360	31,361,113	2%
Dakhliga Canshuuraha	22,885,077	21,344,621	7%
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	7,451,887	2,641,028	182%
Canshuurta Adeegga & Agabka	3,357,440	3,977,067	-16%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	11,427,653	13,853,633	-18%
Canshuuraha Kale	648,097	872,893	-26%
Dakhliyada Kale	9,251,282	10,016,492	-8%
Dakhliga Hantida	42,959	90,189	-52%
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	9,089,117	9,902,826	-8%
Ganaaxa, Ciqaabta	119,206	23,478	408%
DEEQAHA DIBADDA	25,686,841	9,576,362	168%
Deeqaha laba dhinac	8,430,806	4,124,911	104%
Deeqaha Dhincacyada badan	17,256,035	5,451,451	217%

Shaxda 2^{aad}: Dhabta Dakhliga Feb 2025 & 2024

Sida ka muuqato shaxda 2^{aad} dakhliga dawladda ayaa kordhay bish Feb 2025, wuxuuna ka badan yahay 41% wadarta dakhliga dawladda ee la helay bisha Feb 2024. Dakhliga gudaha ayaa kordhay 2% bisha Febraayo 2025, deeqaha dibadda ayaa kordhay 168% marka la barbardhigo dakhliga dawladda ee la helay bisha Febraayo 2024.




Jaantuska 1^{aad}: Dakhalig Bish Febraayo 2025 & 2024

Sida ka muuqata Jaantuska 1^{aad} Dakhliga Gudaha ee la helay bisha Febraayo 2025 ayaa ka badan \$1M dakhliga gudaha ee la helay bish Febraayo 2024. Deeqaha dibadda ee la helay bisha Febraayo 2025 waxay \$16M ka badan deeqaa dibadda ee la helay bisha Febraayo 2024.

Bisha Febraayo 2025, deeqaha dibadda ayaa laga kala helay, waxaa \$7.5M laga helay dawladda Turkiga, dawladda Imaaraadka Carabta ayaa laga helay dakhli ku dhaw 1M. Bangiga Adduunka ayaa laga helay lacag kabadan 15M bisha Febraayo 2025.

DAKHLIGA GUDAHA

Odoroska miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha ayaa ahaa \$430M, waxaana la helay bilaha Jan & Feb 2025 dakhli dhan \$59M oo u dhiganta 14% miisaaniyad sannadadeedka dakhliga



Jaantuska 2^{aad}: Qaybaha Dhabta Dakhliga Gudaha Jan-Feb 2025

gudaha. Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2025 ayaa 2% ka badan dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2024. Dakhliga Canshuuraha ayaa kordhay 3%, halka dakhliyada kale ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2025 uu ka hooseeyo 1% dakhliyada kale ee la helay sannadka 2024.

Sida ka muuqata jaantuska 2^{aad}, iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2025, wuxuu 71% kasoo xarooday dakhliga cashuuraha, halka 29% kasoo xarooday dakhliyada kale.

DAKHLIGA CANSHUURAH

Faah-Faahin	Kharashka Jan iyo Feb 2025	Kharashka Jan iyo Feb 2024	Koror/ Naaqus
Dakhliga Gudaha	58,905,429	58,034,709	2%
Canshuuraha	41,741,897	40,629,942	3%
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	9,878,773	4,641,716	113%
Canshuurta Adeegga & Agabka	7,488,785	8,333,164	-10%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	23,429,679	26,468,981	-11%
Canshuuraha Kale	944,659	1,186,082	-20%
Dakhliyada Kale	17,163,533	17,404,767	-1%
Dakhliga Hantida	139,997	166,700	-16%
Dakhliga libka Agabka iyo Adeegga	16,898,982	17,195,523	-2%
Ganaaxa, Ciqaabta	124,553	42,544	193%

Shaxda 3^{aad}: Iskudarka Dakhliga Gudaha ee Jan-Feb ee Sannadaha 2025 & 2024

Sida ka muuqata shaxda 3^{aad}, iskudarka dakhliga kasoo xarooday Ganaaxa iyo Ciqaabta ayaa kordhay 193% bilaha Jan iyo Febraayo 2025, bilaha Jan-Feb ee sannadka 2025 ayaa la helay dakhli dhan 125K, halka bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2024 la helay dakhli dhan 42K.


Dakhliga Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ayaa kororotay 113% bilaha Jan-Feb sannadka 2025. Waxaa la helay bilaha Jan-Feb sannadka 2025 dakhli dhan \$10M, halka bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2024 la helay dakhli ka hooseeyo sanaddkii hore; waxaa la helay dakhliga dhan \$5M.

Iskudarka Canshuuraha kale ee la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2025 ayaa 20% hoos uga dhacay canshuurihii kale la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2024. Sidoo kale dakhliga

laga helay Dakhliga Hantida ee la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2025 ka hooseeyaa 16% dakhligii hantida ee la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2024.

Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa hoos u dhacay dakhliga la helay bilaha Jan-Feb ee sannadka 2025, wuxuuna hoos u dhacay 10% dakhligii la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2024.

Dakhliga Canshuuraha ayaa loo kala qaadaa 4 qaybood oo kale ah; Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Agabka iyo Adeega, Canshuurta Ganacsiga Dibadda iyo Canshuuraha kale. Canshuurta ugu badan dakhliga gudaha ayaa ah Canshuurta Ganacsiga Dibadda.



Jaantuska 3^{aad}: Iskudarka Dhabta Dakhliga Gudaha, Jan iyo Feb, 2025 iyo 2024

Sida ka muuqato jaantuska 3^{aad} oo soo bandhigaayo isbarbardhigaayo qayabaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wuxuu kaloo muujinyaa kororka iyo naaquska dakhliga canshuuraha marka la is barbardhigo ka dib dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadaha 2025 iyo 2024.

CANSHUURTA DAKHLIGA IYO FAA'IIDOOYINKA

Bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2025 waxaa la soo uruuriyey \$10M oo u dhiganta 26% miisaaniyad sannadeedka 2025 ee Canshuuraha Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, waxayna ka tahay 24% dhabta Dakhliga Canshuuraha ee la helay bilaha Jan-Feb ee sannadaha 2025 iyo 2024. Canshuurtaan ayaa laga qaadaa dakhliga soo gala qofka iyo shirkadaha, waxayna ka kala timaadaa, canshuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah, canshuurta dakhliga kirooyinka daaraha iyo canshuurta faa'iidada shirkadaha.

Canshuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo ku gaarka ah waxaa laga helay bilaha Jan-Feb 2025 dhakhli dhan \$3.6M oo dhiganta 36% wadarta Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ee la helay bilaha Jan-Feb 2025. Canshuurta dakhliga kirooyinka iyo Canshuurta faa'iida shirkadaha

ayaa laga helay \$6M oo dhiganta 64% wadarta Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ee la helay bilaha Jan iyo Feb 2025.

CANSHUURTA AGABKA IYO ADEEGA

Waxaa la helay bilaha Jan-Feb \$7M oo dhiganta 13% miisaaniyad sannadeedka Canshuurta Agabka iyo Adeega. Waxayna ka tahay 18% wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxaa laga qaadaa canshuurtaan ganacsiyada, sida canshuurta gedista ee suuqyada, canshuurta wadamarista gawaarida iyo canshuurta gedista ee laga qaado shirkadaha bixiya adeegyada. Canshuurta gadista ee badeecadaha kasoo daga dekadada ayaa laga helay bilaha Jan-Feb 2025 \$3.8M oo u dhiganta 51% wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega, halka canshuurta gedista ee laga qaado suuqyada magaalada laga helay \$2.7M oo u dhiganta 36% wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega, Canshuuraha Wado-marista iyo Nootaayooyinka ayaa laga helay \$0.97M oo u dhiganta 13% wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la soo uruuriyey bilaha Jan-Feb 2025.

CANSHUURTA GANACSIGA DIBADDA

Waa canshuurta laga qaado badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha Muqdishu. Waana dakhliga ugu muhiimsan dakhliga dawadda kasoo galo gudaha dalka. Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa miisaaniyad sanadeedka 2025 ugu jirta \$186M oo dhiganta 43% wadarta miisaaniyadda Dakhliga Gudaha.

Bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2025 waxaa ka soo xarooday dakhli dhan \$23M oo u dhiganta 56% wadarta Dakhliga Canshuuraha, waxayna ka tahay 13% wadarta miisaaniyad sannadeedka dakhliga Canshuurta Ganacsiga Dibadda.

CANSHUURAH KALE

Miisaaniyad sannadeedka Canshuuraha kale ayaa ah \$15M, waxaana ka soo xarooday bilaha Jan-Feb 2025 dhakhli dhan 945K oo dhiganta 6% miisaaniyadda Canshuuraha Kale. Waxay ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badqabka gawaarida, farankaboolada qaansheegayaasha ganacsiga iyo furdooyinka.

DAKHLIYADA KALE

Dakhliiyada kale, waa dakhli ka soo xarooda adeegyada maamul oo ay bixiso dawladda, sida bixinta shaatiyada ganacsiga, adeegyada garoonka iyo diyaaradaha, bixinta baasaboorada, iyo dalkugalka ajaanibta. Waxaa ka soo xarootay bilaha Jan iyo Feb 2025 dakhli dhan \$17M, oo dhiganta 29% wadarta Dakhliga Gudaha ee la helay.

Dakhliiyada kale ee lasoo uruuriyey bilaha Jan iyo Feb 2025, waxaa \$7M oo dhiganta % wadarta dakhliiyada kale kasoo xarootay adeegyada maamul dawladda ka bixiso Dekadda iyo Groonka diyaaradaha Magaalada Muqdisho. Bixinta Baasaboorada iyo dalkugalka ajaanibta waxaa ka soo xarooday dakhli dhan \$2.5M oo dhiganta 14% wadarta dakhliiyada kale. Diyaaradaha mara hawada soomaaliya waxaa laga helay \$3.3M oo dhiganta 19% wadarta Dakhliiyada Kale ee la helay bilah Jan iyo Feb 2025. Khidmaha Isgaarsiinta ayaa laga helay \$2M oo u dhiganta 12% wadarta dakhliiyada kale.

DEEQAHA DIBADDA

Deeqaha Dibadda oo ka ah 68% wadarta dakhliga miisaaniyadda dawladda, waxaa la helay \$31M oo u dhiganta 3% miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda. Deeqaha dhinacyada badan waxaa la helay \$22M oo dhiganta 3% wadarta miisaaniyadda deeqaha dhinacyada badan ee la helay, deeqaha laba dhiacclaha aha ayaa la helay \$22M oo u dhiganta 3% miisaaniyadda deeqaha laba dhinacle ah.

Sida ka muuqata shaxda 4^{aad} Deeqaha Dibadda ayaa kordhay sannadka 2025, waxaana la helay deeq ka badan 196% deeqaha la helay bilaha Jan ilaa Feb ee sannadka 2024.

Faah-Faahin	Kharashka Jan iyo Feb 2025	Kharashka Jan iyo Feb 2024	Koror/Naaqus
DEEQAHA DIBADDA	30,903,338	10,430,767	196%
Deeqaha laba dhinacclaha	9,357,980	4,124,911	127%
Deeqaha Dhinacyada badan	21,545,358	6,305,856	242%

Shaxda 4^{aad}: Deeqaha Dibadda Jan-Feb 2025 iyo 2024

Deeqaha dibadda waxay isugu jirataa deeq kab miisaaniyadeed oo ay dawladda ka hesho hay'do caalami ah ama dawladda kabo miisaaniyadda dawladda iyo kab mashaariic oo loogu talagalay in lagu fuliyo mashaariic ka socda dalka gudahiisa.

DHABTA KHARASHAADKA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025

Faah-Faahin	Dabta Feb 2025	Dhabta Jan-Feb 2025	Kutalagalka Danbe	Kutalagalka Hore	% Fulinta Kutalagalka Danbe
KHARASHKA GUUD	\$63,131,312	\$86,558,373	\$1,359,714,328	\$1,359,714,328	6%
Kharashaadka Joogtada	54,866,474	78,272,811	631,386,201	628,053,674	12%
Mushaarka Shaqaalaha	35,179,605	55,320,739	365,796,085	365,755,765	15%
Isticmaalka Agabka & Adeega	10,514,791	11,963,538	137,124,239	139,587,608	9%
Dulsaarka	919,882	919,882	13,800,000	13,800,000	7%
Kaalmo Dhaqaale	-	-	-	-	0%
Deeqaha	2,142,613	3,959,068	90,641,266	91,641,266	4%
Faa'idada Bulshada	-	-	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	6,109,584	6,109,584	24,024,610	17,269,034	25%
Kharashaadka Mashaariicda	8,264,837	8,285,562	728,328,127	731,660,654	1%
Mushaarka Shaqaalaha	132,945	132,945	4,728,740	4,244,860	3%
Isticmaalka Agabka & Adeega	3,971,813	3,992,539	259,082,076	256,865,498	2%
Kaalmo Dhaqaale	83,908	83,908	14,620,000	13,280,000	1%
Deeqaha	3,733,381	3,733,381	143,022,709	147,022,709	3%
Faa'idada Bulshada	-	-	77,000,000	77,000,000	0%
Kharashaadka Kale	-	-	64,427,668	68,416,928	0%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	342,790	342,790	165,446,934	164,830,659	0%

Shaxda 5^{aad}: Dhabta Jan-Feb 2025 & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda,

Kharashaadka dawladda oo loo kala qaadaa, kharashaadka joogtada ah iyo Mashaariicda. Kharashaadka joogtada ah waa kharashaadka dawlada ee laga maalgaliyo Dakhliga Gudaha iyo kabka miisaaniyadadeed oo ay dawladdu ka hesho deeqaha dibabadda. Waxaa laga bixiyaa kharashaadka joogta ah ee socodsiina hawalaha dawladda, sida mushaaraadka shaqaalaha Dawladda, isticmaalka agabka iyo adeega ee hay'adaha Dawladda. Kharashaadka Mashaariicda waxaa laga maalgaliyaa kab mashaariicda ee dawladda ka hesho deeqaha dibadda.

Sida ka muuqata shaxda 4^{aad} waxaa la bixiyey bisha Febraayo 2025 kharasha dhan \$63M, kharashaadka joogtada ah waxaa lag bixiyey \$55M oo u dhiganta 87% wadarta kharashaadka guud, kharashaadka mashaariicdana waxaa la bixiyey \$8M oo u dhiganta 13% wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Febraayo 2025.

Mushaarka shaqaalaha ayaa ugu badan kharashaadka la bixiyey bisha Febraayo, waxaana la bixiyey \$35M oo u dhiganta 64% wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo adeega ayaa la bixiyey \$11M oo u dhiganta 19% wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Febraayo 2025.

Iskudarka kharashaadka la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025 ayaa ahaa \$87M oo u dhiganta 6% miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2025. Kharashaadka guud aya la bixiyey \$78M oo u dhiganta 12% miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, halka mashaariicda laga bixiyey \$8M oo u dhiganta 1% miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ee sannadka 2025. Mushaaraadka shaqaalaha dawladda ayaa la bixiyey \$55M oo u dhigant 15% miisaaniyadda Mushaarka shaqaalaha ee kharashaadka joogtada ah. Wuxuuna ka yahay 71% wadarta

kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilah Jan iyo Feb 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa la bixiyey \$12M oo u dhiganta 15% miisaaniyadda isticmaalka agabka iyo adeega ee kharashaadka joogtada ah. Wuxuuna 15% wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka hantida aan maaliyadda ahayn ayaa la bixiyey \$6M oo u dhiganta 25% miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, wuxuuna ka yahay 8% wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025.

Iskudarka Kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb ayaa ahayd \$8M oo u dhiganta 1% miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka mashaariicda. Kharashaadka agabka iyo adeega ayaa la bixiyey \$4M oo u dhiganta 2% miisaaniyadda sannadka. Waxayna ka tahay 48% wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa la bixiyey \$4M oo u dhiganta 3% miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay 45% wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025.

Faahfaahin	Dabta Feb 2025	Dabta Feb 2024	Increase/Decrease
Wadarta Kharashaadka Guud	63,131,312	44,865,526	41%
Kharashaadka Joogtada	54,866,474	39,213,390	40%
Mushaarka Shaqaalaha	35,179,605	26,167,742	34%
Isticmaalka Agabka & Adeega	10,514,791	8,605,645	22%
Dulsaarka	919,882	752,000	22%
Kaalmo Dhaqaale	-	-	0%
Deeqaha	2,142,613	3,688,003	-42%
Faa'iidada Bulshada	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	6,109,584	-	0%
Dib u bixin Daymaha/Horumaris	-	-	0%
Kharashaadka Mashaariicda	8,264,837	5,652,135	46%
Mushaarka Shaqaalaha	132,945	154,920	-14%
Isticmaalka Agabka & Adeega	3,971,813	2,729,598	46%
Kaalmo Dhaqaale	83,908	-	0%
Deeqaha	3,733,381	2,164,159	73%
Faa'iidada Bulshada	-	-	0%
Kharashaadka Kale	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	342,790	603,458	-43%

Shaxda 6^{aad}: Kharashaadka la bixiyey Bisha Feb 2025 iyo 2024

Sida ka muuqato shaxada 6aad waxay isbarbardhigaysa kharashaadkii la bixiyey bisha Feb ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey ayaa kordhay 41% marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Feb ee sannadka 2024.

Kharashaadka joogtada ayaa la bixiyey bisha Feb 2025, kharash dhan 55M oo ka badan 40% kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Feb 2024. Kharashadka mashariicda ayaa la bixiyey \$8M, waxay ka badan tahay 46% kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bish Feb 2024.

Mushaaraadka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Feb 2025 ayaa ahaa \$35M oo 34% ka badan mushaaraadka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bish Feb 2024.

Faahfaahin	Dabta Jan-Feb 2025	Dabta Jan-Feb 2024	Increase / Decrease
Wadarta Kharashaadka Guud	86,558,373	69,285,372	25%
Kharashaadka Joogtada	78,272,811	63,631,095	23%
Mushaarka Shaqaalaha	55,320,739	47,407,153	17%
Isticmaalka Agabka & Adeega	11,963,538	9,887,669	21%
Dulsaarka	919,882	752,000	22%
Kabka	-	-	0%
Deeqaha	3,959,068	5,584,272	-29%
Faa'idada Bulshada	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	6,109,584	-	0%
Dib u bixin Daymaha/Horumaris	-	-	0%
Kharashaadka Mashaariicda	8,285,562	5,654,277	47%
Mushaarka Shaqaalaha	132,945	154,920	-14%
Isticmaalka Agabka & Adeega	3,992,539	2,731,740	46%
Kabka	83,908	-	0%
Deeqaha	3,733,381	2,164,159	73%
Faa'idada Bulshada	-	-	0%
Other expenses	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	342,790	603,458	-43%

Shaxda 7^{aad}: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan iyo Feb 2025 & 2024

Iskudarka kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025 ayaa kordhay 25%, marka la barbarhigo kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2024. Kharashaadka joogtada ah ayaa kordhay 23%, halka kharashaadka mashaariicda ay korhdeen 47% kharashaadkii la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025.

DHABTA KHARASHAADKA JAN IYO FEB, HAY'ADAHA DAWLADDA

Shaxda shannaad waxaa ka muuqda dhabta kharashadka guud ee dawladda ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025, iyadoo loo kala saaray qaybaha loo qaybiyo hay'adaha dawladda. Sidoo kale kharashaadka waxaa loo kala qaaday kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Bilaha Jan iyo Feb 2025, waxaa la bixiyey kharash dhan 87M oo u dhiganta 6% wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka Guud ee dawladda.

Faah-faahinta	Dabta Feb 2025	Dhata Jan-Feb 2025	Kutalagalka Danbe	Kutalagalka Hore	% Fulinta
KHARASHKA GUUD	63,131,312	86,558,373	1,354,232,623	1,354,239,238	6%
Kharashaadka Joogtada	54,866,474	78,272,811	631,217,526	627,891,614	12%
Hay'adaha Adeeg Maamulka	25,056,658	30,611,752	277,231,471	273,973,094	11%
Hay'adaha Adeeg Amniga	19,959,491	36,915,546	257,123,260	257,147,965	14%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	4,585,378	5,215,123	45,073,202	44,965,491	12%
Hay'adaha Adeeg Bulshada	5,264,948	5,530,389	51,789,592	51,805,063	11%
Kharashaadka Mashaariicda	8,264,837	8,285,562	723,015,097	726,347,624	1%
Hay'adaha Adeeg Maamulka	4,047,699	4,061,767	157,874,794	161,147,321	3%
Hay'adaha Adeeg Amniga	-	-	-	-	0%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	2,518,740	2,518,740	287,620,013	287,680,013	1%
Hay'daha Adeeg Bulshada	1,698,398	1,705,055	277,520,289	277,520,289	1%

Shaxda 8^{aad}: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda

KHARASHAADKA JOOGTAD AH

Kharashka ugu badan ee la bixiyey waxaa laga bixiyey miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, waxaana la bixiyey kharash dhan 78M oo u dhiganta 12% wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah. Kharashaadka joogtada ee la bixiye ayaa ahaa 90% ka ahaa wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025.

Mushaarka Shaqaalaha ayaa la bixiyey 35M oo dhigan 15% miisaaniyad sannadeedka mushaarka shaqaalaha. Agabka iyo Adeega ayaa la bixiyey \$11M oo dhiganta 9% miisaaniyad sannadeedka kharashaadka Agabka iyo Adeega.

Iskudarka bilaha Jan iyo Feb ayaa Hay'adaha Amniga lagu bixiyey \$36M oo u dhiganta 14% miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah. Miisaaniyada Hay'adaha Adeega Maamulka ayaa laga bixiyey \$31M oo u dhiganta 11% miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee Hay'adaha Adeega Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha iyo Bulshada ayaa lagu kala bixiyey \$2.5M iyo \$1.7M oo u dhiganta 1% miisaaniyad sannadeedka Hay'adaha Dhaqaalaha iyo Bulshada.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Kharashaadka Mashaariicda ayaa la bixiyey \$8M oo u dhiganta 1% miisaaniyad sannadeedka kharashaadka mashaariicda, wuxuuna ka badan yahay 47% kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilah Jan iyo Feb ee sannadka 2024.

Kharashaadka baxay waxaa lagu bixiyey adeegyada Bangiga Dhexe, waxaana laga bixiyey dakhliyo u yimid mashaariicda inta lagu guda jiray bisha Jan 2025.

Lifaaqa 1^{aad}: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah, 2025

Code	Decriptions	Iskudarka Kharshaadka Jan iyo Feb 2025	Kutalagalka Danbe	Kutalagalka Hore	% Fulinta Kutalagalka Danbe
010100	Xafiiska Madaxtooyada	1,531,479	12,417,171	12,529,086	12%
21	Mushaarka Shaqaalaha	1,090,341	6,550,197	6,662,112	17%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	168,064	956,763	1,012,068	18%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	912,737	5,536,194	5,592,804	16%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	9,540	57,240	57,240	17%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	441,138	5,834,203	5,834,203	8%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	1,425,000	1,425,000	0%
2221	Hawlaha Guud	26,957	323,492	323,492	8%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	61,494	737,959	737,959	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	1,558	18,700	18,700	8%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	36,000	36,000	0%
2231	Kirooyin	5,000	60,000	60,000	8%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	264,312	2,251,200	2,251,200	12%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	81,817	981,852	981,852	8%
26	Deeqaha	-	32,771	32,771	0%
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	-	32,771	32,771	0%
010201	Xafiiska Golaha Shacabka	4,040,144	27,949,571	27,893,681	14%
21	Mushaarka Shaqaalaha	3,703,890	22,419,330	22,363,440	17%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	350,005	2,155,830	2,095,620	16%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	3,353,885	20,263,500	20,267,820	17%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	336,254	4,494,476	4,494,476	7%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	53,285	720,000	720,000	7%
2221	Hawlaha Guud	13,378	295,250	295,250	5%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	40,960	491,520	491,520	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	19,600	235,200	235,200	8%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	20,961	251,526	251,526	8%
2231	Kirooyin	-	243,600	243,600	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	188,070	2,257,380	2,257,380	8%
31	Soo iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn	-	1,035,765	1,035,765	0%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	1,035,765	1,035,765	0%
010202	Xafiiska Aqalka Sare	966,204	8,003,196	7,973,196	12%
21	Mushaarka Shaqaalaha	783,804	4,723,296	4,723,296	17%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	26,490	161,280	161,280	16%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	757,314	4,562,016	4,562,016	17%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	182,400	2,275,900	2,245,900	8%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	16,400	196,800	196,800	8%
2221	Hawlaha Guud	10,550	147,600	147,600	7%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	22,250	267,000	267,000	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	21,600	289,200	259,200	7%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	36,000	36,000	0%

2231	Kirooyin	16,200	194,400	194,400	8%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	95,400	1,144,900	1,144,900	8%
31	Soo iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn	-	1,004,000	1,004,000	0%
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	900,000	900,000	0%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	104,000	104,000	0%
010300	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	1,273,439	11,691,791	10,610,236	11%
21	Mushaarka Shaqaalaha	601,458	3,687,867	3,689,352	16%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	153,614	947,754	928,584	16%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	444,444	2,719,713	2,740,368	16%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	3,400	20,400	20,400	17%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	671,981	7,503,924	6,420,884	9%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	138,000	1,020,000	1,020,000	14%
2221	Hawlaha Guud	33,270	399,400	399,400	8%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	51,645	619,748	619,748	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	16,681	200,244	200,244	8%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	40,000	40,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	324,620	3,903,240	2,848,200	8%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	107,765	1,321,292	1,293,292	8%
31	Soo iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn	-	500,000	500,000	0%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	500,000	500,000	0%
010400	Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga	497,481	4,190,468	4,028,603	12%
21	Mushaarka Shaqaalaha	407,814	2,698,305	2,551,020	15%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	279,434	1,774,800	1,696,680	16%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	128,380	923,505	854,340	14%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	89,667	1,492,163	1,477,583	6%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	480,000	480,000	0%
2221	Hawlaha Guud	10,997	132,083	132,083	8%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	96,000	96,000	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	97,500	97,500	0%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	16,160	16,160	0%
2231	Kirooyin	-	81,000	81,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	78,670	495,420	480,840	16%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	-	94,000	94,000	0%
010401	Safaaradaha	645,192	5,399,729	5,381,729	12%
21	Mushaarka Shaqaalaha	353,100	4,545,120	4,518,300	8%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	124,530	1,730,295	1,714,860	7%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	228,570	2,814,825	2,803,440	8%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	292,092	854,609	863,429	34%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	78,500	264,000	0%
2221	Hawlaha Guud	-	66,925	166,925	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	69,327	159,327	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	49,327	89,327	0%
2231	Kirooyin	-	74,475	86,925	0%

2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	292,092	516,055	96,925	57%
010500	Wasaaradda Maaliyadda	2,522,992	17,082,209	16,661,302	15%
21	Mushaarka Shaqaalaha	1,814,122	11,381,577	11,332,932	16%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	672,092	4,122,258	4,043,580	16%
2113	Gunnyoyin Lacag Cadaan ah	1,101,090	7,012,959	6,994,992	16%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	40,940	246,360	294,360	17%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	638,335	5,200,632	4,828,370	12%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	56,933	480,000	480,000	12%
2221	Hawlaha Guud	60,024	821,320	821,320	7%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	17,982	216,000	216,000	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	100,181	940,507	940,507	11%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	17,900	365,599	365,599	5%
2231	Kirooyin	194,700	384,000	384,000	51%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	-	672,262	300,000	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	190,615	1,320,944	1,320,944	14%
31	Soo iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn	70,535	500,000	500,000	14%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	70,535	500,000	500,000	14%
010501	Xafiiska Xisaabiyaha Guud	475,666	3,430,309	3,413,164	14%
21	Mushaarka Shaqaalaha	407,375	2,771,505	2,754,360	15%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	126,825	809,940	789,060	16%
2113	Gunnyoyin Lacag Cadaan ah	209,370	1,529,145	1,532,880	14%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	71,180	432,420	432,420	16%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	68,291	658,804	658,804	10%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	1,140	36,874	36,874	3%
2221	Hawlaha Guud	12,105	174,950	174,950	7%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	1,797	36,050	36,050	5%
2224	Agabka iyo Alaabaha	37,366	275,930	275,930	14%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	15,000	15,000	0%
2231	Kirooyin	12,312	48,000	48,000	26%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	3,571	72,000	72,000	5%
010502	Adeega Guud ee Dowladda	6,163,093	121,762,513	125,322,973	5%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	1,284,144	15,383,561	18,944,021	8%
2243	Adeegyadda Bangiga	1,284,144	13,678,207	13,678,207	9%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	-	169,814	265,814	0%
2291	Kharashka kutalagalka Lama Filaan	-	1,535,540	5,000,000	0%
24	Dulsaarka	919,882	13,800,000	13,800,000	7%
2411	Dulsaarka la Siinayo Dadka aan Deganayn Dalka	919,882	13,800,000	13,800,000	7%
26	Deeqaha	3,959,068	90,108,495	90,108,495	4%
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	327,637	8,594,000	8,594,000	4%
2631	Deeqaha Joogtada ah ee La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda	3,631,431	81,514,495	81,514,495	4%
31	Soo iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn	-	2,470,457	2,470,457	0%

3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	300,000	300,000	0%
3112	Qalabka iyo Mashinadda	-	370,457	370,457	0%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	1,400,000	1,400,000	0%
3114	Nidaamyada Hubka	-	200,000	200,000	0%
3144	Hantida aan Qiimo Dhicin ee an la Taaban Karin	-	200,000	200,000	0%
010503	Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed ee Soomaaliya	65,619	997,837	1,004,452	7%
21	Mushaarka Shaqaalaha	57,371	741,837	748,452	8%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	20,271	236,637	243,252	9%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	37,100	505,200	505,200	7%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	8,248	256,000	256,000	3%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	120,000	120,000	0%
2221	Hawlaha Guud	4,999	60,000	60,000	8%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	1,250	15,000	15,000	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	1,999	24,000	24,000	8%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	1,000	1,000	0%
2231	Kirooyin	-	36,000	36,000	0%
010600	Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha	381,599	2,796,158	2,757,998	14%
21	Mushaarka Shaqaalaha	307,596	1,977,231	1,939,836	16%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	151,146	979,701	939,336	15%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	133,030	857,010	859,980	16%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	23,420	140,520	140,520	17%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	74,003	818,927	818,162	9%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	121,500	121,500	0%
2221	Hawlaha Guud	9,500	114,000	114,000	8%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	2,000	24,000	24,000	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	2,000	24,000	24,000	8%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	2,666	2,666	0%
2231	Kirooyin	-	96,000	96,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	49,170	300,765	300,000	16%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	11,333	135,996	135,996	8%
010601	Hey'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya	171,820	1,308,394	1,304,029	13%
21	Mushaarka Shaqaalaha	47,400	288,765	284,400	16%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	47,400	288,765	284,400	16%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	124,420	1,019,629	1,019,629	12%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	24,000	24,000	0%
2221	Hawlaha Guud	-	20,000	20,000	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	20,000	20,000	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	20,000	20,000	0%
2231	Kirooyin	-	48,000	48,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	124,420	867,504	867,504	14%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	-	20,125	20,125	0%

010700	Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta	370,183	2,941,385	2,950,880	13%
21	Mushaarka Shaqaalaha	276,843	1,729,413	1,737,828	16%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	195,573	1,176,993	1,183,608	17%
2113	Gunnyoyin Lacag Cadaan ah	81,270	552,420	554,220	15%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	93,340	1,211,972	1,213,052	8%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	36,000	36,000	0%
2221	Hawlaha Guud	-	80,408	80,408	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	88,200	88,200	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	54,004	54,004	0%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	3,800	3,800	0%
2231	Kirooyin	-	120,000	120,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	93,340	559,560	560,640	17%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	-	270,000	270,000	0%
010701	Hey'adda Qoxootiga iyo Barakacayaasha Qaran	63,755	830,125	843,040	8%
21	Mushaarka Shaqaalaha	63,755	757,125	770,040	8%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	29,775	332,301	338,916	9%
2113	Gunnyoyin Lacag Cadaan ah	33,980	424,824	431,124	8%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	-	73,000	73,000	0%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	24,000	24,000	0%
2221	Hawlaha Guud	-	24,000	24,000	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	12,000	12,000	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	12,000	12,000	0%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	1,000	1,000	0%
010702	Hey'adda Aqoonsiga iyo Diwaangelinta Dadwaynaha	184,800	2,024,895	2,025,660	9%
21	Mushaarka Shaqaalaha	47,270	293,355	289,620	16%
2113	Gunnyoyin Lacag Cadaan ah	47,270	293,355	289,620	16%
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	137,530	1,149,540	1,154,040	12%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	24,000	24,000	0%
2221	Hawlaha Guud	6,000	72,000	72,000	8%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	12,000	12,000	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	12,000	12,000	0%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	2,000	2,000	0%
2231	Kirooyin	-	100,840	100,840	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	131,530	881,580	886,080	15%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	-	45,120	45,120	0%
31	Soo iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn	-	582,000	582,000	0%
3112	Qalabka iyo Mashiinadda	-	270,000	270,000	0%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	312,000	312,000	0%
010703	Hey'adda Maaraynta Masiibooyinka	351,278	8,833,953	13,821,758	4%
21	Mushaarka Shaqaalaha	268,258	1,716,318	1,696,788	16%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	124,607	793,722	780,492	16%
2113	Gunnyoyin Lacag Cadaan ah	33,970	225,120	218,820	15%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	109,681	697,476	697,476	16%

22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	83,020	3,117,635	5,624,970	3%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	120,000	120,000	0%
2221	Hawlaha Guud	-	24,000	24,000	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	24,000	24,000	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	24,000	24,000	0%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	4,750	4,750	0%
2231	Kirooyin	-	16,500	16,500	0%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	500,000	1,000,000	0%
